Print form Reset form

Oregon Department of Human Services
AGING & PEOPLE WITH DISABILITIES

Ogaysiis: APD0070B

Xafiiska qaybta: _____ Barnaamijka: _____

Lambarka takleefonka: _____ Shaqaalaha: _____

Lambarka kiiska: _____

Magaca kiska: _____

Magaca wargelinta: _____

Taariikhda daqan galka ah: _____

Wargelinta Qiimaynta U Qalanka Adeega

Qiimaynta u qalankaaga adeega Medicaid waxay ku eeg tahay _____. Maamulaha Kiiskaaga ayaa kuula soo xidhiidhi doona sida ugu dhakhsaha badan si uu kuugu qabto wakhtiga kulanka lagu qiimayn doono baahidaada daryeelka.

Kulanka, waa in adiga iyo maamulaha kiiskaagu aad ka wada hadashaan baahiyahaaga daryeelka iyo adeegyada socda. Waxaa lagugu dhiiri gelinayaa inaad kusoo casuunto dad noloshaada ku jira oo ku caawin kara, oo waxaa kamid ah xubnaha qoyska, kulanka.

Inaad ka daacad sheegto baahiyahaaga daryeelka ayaa muhiim ah inay saxnaanto qiimayntu. Fadlan u diyaare garaw inaad kala hadasho nooc walba oo daryeelkaaga ah, oo waxaa kamid ah mudada iyo inta jeer ee kalamadu imanayso. Waxaa wax tari kara in aad duwaan geliso baahiyahaaga daryeelka kahor kulanka aad la geleyso maamulaha kiiska.

Waxa aad dalban kartaa saacada iyo taariikhda, kahor _____, adiga kuu haboon kulanka. Kaalmada waxaa lagu bixiyaa gurigaaga saacadaha iyo maalmaha shaqo, marka laga tago xaaladaha gaarka ah.

Hadii aanad ku qancin qiimayntaada ama qorshahaaga adeega, fadlan kala hadal maamulaha kiiskaaga. Waxa aad sidoo kale rafcaan ka qaadan kartaa go'aanka adiga oo dalbanaya dhagaysi.

Waa kuwan waxyaabo aad filan karto wakhtiga qiimaynta:

- Maamulaha kiiska ayaa ku waydiin doonaa su'aalo kala duwan oo ku saabsan nooca kaalmada ay dadka kale u baahan yihiin. Su'aalaha qaar waxay ka hadlayaan mawduuc aad u shakhsi ahaaneed oo ay dhici karto in aanad jeclaysan. Laakiin, macluumaadkan waxa uu ka caawinayaa maamulaha kiiska inuu ogaado cida u qalanta wixii adeegyada Medicaid ah. Maamulaha kiiska ayaa ku waydiin doonaa su'aalahan iyada oo sharaf iyo maamuus ku dheehan yahay.

- Su'aalaha uu ku waydiinayo maamulaha kiiska waxaa sidoo kale ka mid noqon doona inta jeer ee aad u baahan tahay kaalmo dadka kale.

- Waxa sidoo kale wanaagsan inaad daaaawadsiiso maamulaha kiiskaaga gurigaaga. Tani waxay ka caawin kartaa maamulaha kiiskaaga inuu si dhaanta u fahmo baahiyahaaga daryeelka.

- Marka aad u ogolaato, maamulaha kiiskaaga waxa uu ka dalban karaa dadka kale inay ka caawiyaan si uu u helo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxa u baahan kaalmo. Maamulaha kiiska ayaa sidoo kale ku waydiin kara waraaqaha caafimaadka.

Waa kuwan waxyaabo aad filan karto kadib wakhtiga qiimaynta aad buuxiso:

- Hadii ay jiraan wax isbadal ah oo adeegyada aad qaadanayso ah, waxaad heli doontaa macluumaad kuu sheegaya sababta go'aanka loo gaadhay. Fadlan kala hadal maamulaha kiiska wixii su'aalo ah ee aad qabto.

- Hadii aad u qalanto adeegyada, waxa aad heli doontaa waraaqaha qaar aad u baahan tahay inaad akhrido, saxeexdo oo aad kusoo celiso maamulaha kiiska sida ugu dhakhsaha badan.

- Adiga iyo maamulaha kiiskaaga ayaa u wada shaqayn doona qaabka ugu wanaagsan ee aad u heli karto kaalmada aad u baahan tahay. Waxa taas kamid ah dhamaan ikhtiyaarada aad heli karto.

- Hadii aad u qalanto oo aad go'aansato inaad hesho daryeel lacag laga bixinayo oo gurigaaga ah, maamulaha kiiskaaga ayaa eegi doona inta saacadood ee aad u qalanto. Laakiin, hadii aad u baahan tahay saacado dheeraad ah, waxa aad dalban kartaa "wax laga soo reebey", taas oo, hadii la ansixiyo, kuu sahlaysa saacado dheeraad ah oo aad ku buuxinayso baahiyahaaga. Maamulaha kiiskaaga ayaa kaala shaqayn doona dalabkan isaga oo eegaya mudada iyo inta jeer ee aad u baahan tahay in shaqooyinkan gaarka ah laguu qabto. Maamulaha kiiska ayaa kala shaqayn doona maamulihiisa iyo shaqaalaha kale sidii loo eegi lahaa hadii aad u qalanto saacado dheeraad ah.

Xuquuqdaada Dacwad Dhagaysi

Waxa aad sameyn karto haddii aanad ku raacsanayn go'aankani:

- Waxaad xaq u leedahay in aad ka doodid go'aankan oo aad codsato dhageysi maxkamadeed. Dhageysiga maxkamadeed waxaa qabta Xafiiska Maamulka Dhageysiyada, oo ka madax bannaan Waaxda Adeegyada Dadweynaha (Department of Human Services – DHS) ama Maamulka Caafimaadka Oregon (Oregon Health Authority - OHA).

Haddii aad doonayso, waa in aad ku codsato waqtiga loogu talagalay.

- Sidoo kale waxaad kala hadli kartaa maamulaha kiiska. Waxaad waci kartaa xafiiska degmada lambarka telefoonku wuxuu ku qoran yahay http://www.oregon.gov/DHS/Offices/Pages/index.aspx. Taariikhda laguu qabtay in aad ku soo gudbiso codsiga dhageysiga *(Qaybta 1aad ee hoose)* ma ay isbeddelayso xittaa haddii aad la xiriirto maamulaha kiiska ama aad raadinayso. Haddii aad wali u baahan tahay taageero dheeraad ah, waxaad la xiriirtaa Xafiiska Qareenka Gudoomiya Gobolka 1-800-442-5238.

Qaybta 1aad – Waxaad codsataa dhageysi.

Sideen u codsadaa dhageysiga dhexdhexaadka ah? U qalmida gargaarada cuntada ama caafimaadka, Waxaad codsan kartaa dacwad dhagaysi ku qoran foomka MSC 0443, adigoo teleefoon soo wacaya, qoraal soo diraaya ama waxaad shakhsi ahaan u waydiisaa shaqaalaha DHS. Gargaarada kale, waa in aad buuxiso foomka Codsiga Dhegeysiga Maxkamadeed (Administrative Hearing Request – MSC 0443) ka dibna aad u soo celisaa xafiiska DHS ama OHA. Waxaad ka helaysaa xafiiska DHS ama OHA ama bogga internetka https://apps.state.or.us/Forms/Served/mi0443.pdf. Xafiiska degaankaaga ayaa kaa caawin kara codsiga dhegeysiga maxkamadeed. Xilli kasta ayaad codsan kartaa dhageysiga maxkamadeed haddii aadan kula raacsaneyn inta aad qaadato Gargaarka Cuntada. Waxaad haysataa 90 maalmood oo aad ku codsato dhegaysiga gargaarada cuntada, u qalmida barnaamijka caafimaadka, iyo dhimista barnaamijka TANF haddii aadan iskaashi la yeelan waydo qorshaha dacwadaada. Marka ay noqoto diidmada adeega caafimaadka: haddii aad tahay xubin ka tirsan kharashka adeega la bixiyo 'fee-for-service' waxaad haysataa 60 maalmood laga bilaabo taariikhda ogeysiiska in aad ku codsato dacwad dhageysi; haddii aad isqortay Daryeelka Urruradu Iska kaashadeen (CCO), marka rafcaanka la dhammestiro iyada oo la adeegsanayo CCO-gaaga waxaad haysataa 120 maalmood laga bilaabo taariikhda ku taal warqada Ogeysiinta Xallinta Rafcaanka 'Notice of Appeal Resolution' in aad ku codsato dacwad dhageysi. Xaaladaha kale, DHS waa in ay codsigaaga ku heshaa mudo 45 maalmood gudahood laga soo billaabo taariikhda ku cad ogeysiiska go'aanka taariikhda la soo diraayo.

Fariin ku socota dadka ciidamada ka tirsan: Xubnaha shaqada ciidan hayaa waxay leeyihiin xuquuqda ay kaga joogi karaan (dib u dhigi karaan) dacwadan maxkamadeed sida uu dhigayo Xeerka Sahlida Dadka Ciidamada ka Tirsan (Servicemembers Civil Relief Act - SCRA). Wixii macluumaad dheeraad ah, kala xiriir Ururka Qareennada Gobolka Oregon 1-800-452-8260, Qaybta Ciidamada Oregon 503-584-3571 ama xafiiska taageerada dhanka sharciga ee kuugu dhow, http://legalassistance.law.af.mil.

Yaa iga caawini karaya dhegeysiga maxkamadeed? Barnaamijyada gargaarada cuntada iyo caafimaadka, qof kasta ayaa wakiil kaa noqon kara. Barnaamijyada oo idil, waa in aad adigu iska wakiil noqoto ama aad qabto qareen ama qof xagga sharciga kaa caawiya *(oo ay kormeerayaan qareen ka socda Gargaarka Sharciga [Legal Aid])* oo wakiil kaa ah. Waxaad wici kartaa Khadka Gargaarka Dadweynaha *(barnaamij ka tirsan Adeegyada Gargaarka Sharciga ee Oregon iyo Xarunta Sharciga Oregon)* taleefoonka **1-800-520-5292** si aad u hesho talo iyo qof kaa wakiil noqda.

Waa maxay xuquuqaha kale ee aan u leeyahay dhageysiga maxkamadeed? Dhageysiga maxkamadda, waxaad ku sheegi kartaa sababta aadan kula raacsaneyn go'aanka. Waxaad la imaan kartaa dad kuu marqaati fura. Sharciyada ku saabsan xuquuqaha aad u leedahay dhageysiga maxkamadeed iyo nidaamka dhageysiga waxay kala yihiin OAR 137-003-0501 illaa 0700, 410-120-1860, 410-141-0264, 461-025-0300 illaa 0375, ORS 183.411 illaa 183.470, iyo ORS 411.095.

Maxaa dhacaya haddii aan la qaban dhageysiga maxkamadda? Haddii aadan waqtiga la doonayo ku codsan dhageysiga maxkamadda, ama haddii aad ka noqoto codsiga dhageysiga maxkamadda ama aysan kuu suuragelin in aad ka qayb gasho dhageysiga maxkamadda, waxaad khasaari kartaa xuquuqda aad u leedahay dhegeysiga maxkamadda. Ogeysiiskaan waa go'aanka kama dambeysta ah ee DHS ama OHA *(oo loo yaqaan "amarka caadi ahaan noqanaya kan kama dambeysta ah")*. Ma aad heli doontid amar kale oo kama dambeysta caadiga ah. Galka kiiska, oo ay la socdaan alaabta aad soo gudbisay ee mawduucan ku saabsan, ayaa gal ahaan loo tixgelin doonaa. Waxaa macluumaadka loo adeegsadaa in lagu taageero go'aanka waajibka ee DHS. Waxaad rafcaan ka codsan kartaa amarka caadiga ee kama dambeysta ah adigoo codsi rasmi ah u soo gudbinaya Maxkamadda Rafcaanka ee Oregon (ORS 183.482). Haddii aadan codsan dhageysiga maxkamadda, waa in rafcaanka lagu soo gudbiyo 60 maalmood gudahooda laga billaabo taariikhda ogeysiiska uu noqdo amarka caadiga ah ee kama dambeysta. Haddii aad ka noqoto codsiga dhageysiga maxkamadda ama aysan kuu suuragelin in aad timaad, muddada rafcaanka waxaa lagu soo caddeynayaa amarka ruqsadda.

Qaybta 2aad – Sideen u sii heli karaa gargaarka illaa laga gaarayo dhageysiga maxkamadda?

- Waxaad codsan kartaa in gargaarkaaga uu intiisa ahaado illaa laga gaarayo go'aanka dhageysiga maxkamadeed *("socoshada gargaarka")*. Gargaarada cuntada iyo caafimaadka, waxaad isticmaashaa foomka MSC 0443, adigoo teleefoon soo wacaya, qoraal soo diraaya ama waxaad shakhsi ahaan u waydiisaa shaqaalaha DHS. Barnaamijyada kale, waa in aad codsato foomka Codsiga Dhageysiga Maxkamadeed (MSC 0443).
- Waa in aad laantaada ka codsato socoshada gargaarada "taariikhda ay dhaqan-galeyso" ("effective date") ee ku taal ogeysiiska ama 10 maalmood ka dib taariikhda loo aqoonsado taariikhda ogeysiiska la soo diraayo, ama (ta ku saabsan caafimaadka kaliya) 10 maalmood ka dib marka la helo nuqulka ogaysiiska. Waa in aad codsatid hadba taariikhda dambeysa.
- Haddii aad gargaarka sii heshid balse aad ku guul darreysato dhageysiga, waa in aad dib u bixisaa gargaarkii ahaa in aadan qaadan.
- Haddii aadan gargaarka sii qaadan islamarkaana go'aanka dhageysiga maxkamadda uu noqdo mid aad ku guuleysato, DHS ama OHA waxay ku siinaysaa gargaarkii ahaa in aad qaadato.

Qaybta 3aad – Dhegeysi degdeg ah miyaa la ii qaban karaa?

Waxaa suuragal ah in aad xaq u leedahay "dhegeysi degdeg ah" mid kasta oo ka mid ah gargaarada ama xaaladaha soo socda:

- Gargaarka Cuntada degdegga ah
- JOBS iyo lacagta TANF-ka hor
- Lacagaha iyo u qalmidda Gargaarka ku Meel Gaarka ah ee Dadka ka Badbaaday Rabshadaha Qoyska (Temporary Assistance for Domestic Violence Survivors – TA-DVS)
- Xaalada caafimaad, waxaad leedahay baahi degdeg ah oo ku saabsan adeegyada caafimaad iyadoo wakhtiga loo qabto hawsha rafcaan qaadashadu ay halis gelin karto noloshaada ama caafimaadkaaga ama awooda aad meel ku gaarayso, sii wadashada, ama dib u hanashada dhaqdhaqaaq buuxa
- DHS ama OHA waxay diiday codsiga aad ku sii qaadanaysid gargaarka illaa laga gaaraayo dhageysiga maxkamadda.

Waaxda Adeegyada Dadwaynaha (DHS) iyo Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) qofna takoori maayaan. Tani macnaheedu waa in DHS|OHA ay saacidi doonaan dhammaan inta u qalanta iyaga oo aan qofna si kale ula dhaqmi doonin iyagoo sabab uga dhigaya da'da, jinsiyada, midabka, dalka uu ka soo jeedo, lab ama dhidig, diinta, siyaasada la aaminsan yahay, naafanimada iyo doorbidida galmada qofka. Waxaad gudbin kartaa cabasho haddii aad aaminsan tahay in DHS ama OHA si aan caadi ahayn ay kuula dhaqmeen iyadoo ay la xiriirto sobobahani.